

# Ma Rabtaa inaad Ogaato Halka aad Aadi Karto?



# Hagaha Isku Xirka Caafimaadka Dhimirka ee Degmada Brown

## Badbaado ah

MyConnectionNEW.org

Ku xirnoow adeegyada & taageerooyinka caafimaadka dhimirka **Maxalliga** ah

MyConnectionNEW.org waa isha kheyraadka loogu talagalay caafimaadka dhimirka & isticmaalka daroogada, ilaha, iyo isku xirka adeegga.

## Halis Kujira

2·1·1

Ku Xirnoow. Hel Caawimaad.™

Wac ama Farriin udir 211 markasta si lagaaga caawiyo si bilaash ah baahiyaha aadanaha, bulshada, dhimirka iyo baahiyaha aasaasiga ah iyo si caawimaad lagaaga siiyo inta lagu jiro xaaladaha musiibooyinka ah.

## Aan Badbaado Ahayn

Adeegyad a Qoyska

Ilaalin.Bogsasho.Daryeel.

Wac waqti kasta 920-436-8888 marki taageero degdeg ah loo baahan yahay si looga hortago in xaalad ay noqoto mid khatar ah.

## Khatarta

BROWN COUNTY DISPATCH 9-1-1 EMERGENCY 2001

Wac 911 si aad gargaar degdeg ah ooga codsato booliska, dabdamiska iyo shaqaalaha samatabixinta xaalad kasta oo socota taas oo suuragal ah inay kadhalato wax khatar ku ah nolosha qofka.



# Waxa la Filan Karo

## Xarunta Xasarada:

- La taliyaha xasarada ayaa kula hadli doona si ay u fahmaan xaalada oo ayna kaa caawiyaan xallinta dhibaatada, sahminta xulashooyinka, oo ay suuragal tahay inay kuu soo diraan caawin lagu dajinayo xasarada.
- Haddii ay jiraan walaacyo laga qabo in qofka naftiisa ama qof kale uu waxyeeleyn karo, la taliyaha xasarada ayaa dhammeystiri doona qiimeynta halista waxa uuna kaala shaqeyn doonaa go'aaminta waxa loo baahan yahay in lagu caawiyo qofka si looga dhigo mid ammaan ah oo xasilloon.
- La taliyaasha xasarada waxa ay ka shaqeeyaan inay taageerada xog ogaalka shoogga, xudun u ah qofka ku bixiyaan habka ugu caqabada yar. Isbitaal dhigista waxa ay dhacdaa mararka qaarkood, iyadoo ah xulashada udambeysa uguna yar ee la isticmaalo. Dadka badankooda waxaa lagu caawiyaa helida habab ay ku kordhiyaan taageerada oo ay u yareeyaan halista noloshooda maalinlaha ah.
- La talinta xasarada waa adeeg muddo gaaban ah si wax looga qabto baahi degdeg ah oo caafimaadka dhimirka ah. Haddii adeegyo socdo loo baahdo, ama haddii ay jiraan baahiyo loo qabo adeegyada oo ka baxsan taageerada caafimaadka dhimirka, la taliyaha xasarada waxa uu ka caawin doonaa dadka ku xiridda ilaha kheyraadka.

Adeegyo dabagal ah ayaa la bixin doonaa si loo go'aamiyo in dhibaatadii la xalliyey ama in loo baahan yahay taageero dheeraad ah.

## 911:

- Fadlan ka wac 911 wixi caawin ah haddii adiga ama qof aad garaneyso uu khatar ugu jiro dhibaato ay keentay caafimaadka dhimirka.

## Wixi xog dheeraad ah booqo:

MyConnectionNEW.org
https://www.browncountyunitedway.org/2-1-1/
https://www.familyservicesnew.org/crisis-center/

Caafimaadka Dadweynaha
Kahortag. Dhiirigelin. Ilaalin.
Degmada Brown
Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha

Xiriirinta
*Badqabka Maskaxda*

Degmada Brown
Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha
Adeegyada Bulshada